Elim HOUSING | Homes that change people's lives
Briarlands Office Park
Gloucester Road
Rudgeway
Bristol BS35 3QH

**T:** 01454 411172
**W:** www.elimhousing.co.uk

**Guddoomiyaha Kooxda:** Sally Mason MSc
**Guddoomiyaha Fulinta:** Paul Smith CIHCM

30-ka Luulyo 2025

**Macaamiilka Sharafta leh**

Waxaan kula soo xiriirayaa si aan u weydiiyo ra'yigaaga ku saabsan qorshaheena ah in Elim Housing Association ay ku biirto Places for People. Waxaan hoos ku bixinay sharaxaad ku saabsan waxa ay tani ka dhigan tahay.

Warqaddan waxay bilaw u tahay wada-tashi soconaayo muddo lix toddobaad ah, kaas oo dhammaanaya 10ka Sebtembar 2025. Inta lagu jiro waqtigan, waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha isku biirista, waxaad weydiin kartaa wixii su'aalo ah oo aad qabtid, waxaadna u dhiiban kartaa ra'yigaaga siyaabo kala duwan. Waxaad faahfaahin dheeraad ah ka heli doontaa bogga '*Faahfaahinta Qorshaha isku biirista'* ee warqaddan lagu lifaaqay.

**Qoshaha Midaynta**

Qorshaha Midaynta waxay dhacdaa marka laba ama in ka badan oo ururro ah ay isku biiraan si ay u sameeyaan hal urur oo cusub, ama marka urur yar uu ku biiro urur weyn oo uu noqdo laan ka tirsan ururka weyn.

Waxaan qorsheeynaynaa in aan galno heshiis midow, taasoo micnaheedu yahay in Elim Housing Association ay noqon doonto laan hoosaad ka tirsan Places for People bisha Diseembar 2025. Marka hore, waxaan sii haysan doonaa magaceena iyo astaanta Elim Housing Association, waxaana filaynaa in aan si buuxda ugu midowno kooxda Places for People labadan sano ee soo socda gudahood. Inta lagu jiro waqtiga ay Elim tahay laan hoosaad ka tirsan Places for People, waxaan sii wadi doonaa in aan u shaqeyno sida aan hadda u shaqeyno. Si kastaba ha ahaatee, waxaan sidoo kale heli doonaa taageero iyo adeegyo dheeraad ah oo ka imaanaya Places for People, kuwaas oo aan hadda heli karin. Tani waxay ka caawin doontaa ururkeenna inuu noqdo mid wax ku ool ah, isla markaana kor loogu qaado maalgashiga guryaheena iyo adeegyada aan siino macaamiisheena.

Baahida loo qabo in maalgashi dheeraad ah lagu sameeyo guryaha iyo adeegyada ayaa ah sababta ugu weyn ee keentay in Elim ay tixgeliso la midowga Places for People. Elim waa urur hammi leh, waxaanuna ku faanaynaa taariikhdeena iyo isbeddelka ay guryahayaga iyo adeegyada khaaska ah ka sameeyaan meelaha aan ka howl galno. Waxaan dooneynaa in aan hubinno in aan sii wadi karno bixinta guryo tayo sare leh, hoy

iyo adeegyada taageerada. Xaaladda dhaqaale ee hadda jirta ayaa ka dhigtay mid aad u adag in aan keligeen gaarnno hamigeenna. Qorshaha midowga wuxuu la macno yahay inaan ka faa'iideysan karno tageero badan oo ay Places for People bixin karto. Waxay naga caawin doontaa inaan dare u qaadno tayada guryihiinna, oo aan dhisno guryo badan oo cusub, iyo inaan si dhaqso ah u horumarino adeegyada, marka loo eego sidii aan u horumarini lahayn haddii aan kaligeen ahaan lahayn.

**Lammaanaha suurtagalka ah in lala midoowo: Places for People**

Markii la dooranayey lammaanaha suurtagalka ah in lala midoowo, guddiga Elim wuxuu tixgeliyey ururo dhowr ah oo kala duwan. Waxaan u dooranay Places for People sababtoo ah waxaan aaminsanahay inay tahay urur leh baaxad, kheyraad, iyo filasha ah in ay gaarsiin karto adeegyo badan dhammaan macaamiisha Elim. Places for People sidoo kale waxay ka shaqeeyaan isla deegaanada aan annaguna ka shaqeyno. Horey ayaan aqoon wanaagsan oo xagga wada-shaqaynta ah ugu leenahay anaga oo kala shaqaynay adeegyada taageerada dadka gurya la'aanta ah.

**Faa'iidooyinka midowga la qorsheeyay**

Midowga la qorsheeyay wuxuu faa'iido u keeni doonaa macaamiisha Elim.

- Places for People waxay maalgelin ku samayn doonaan guryaha Elim. Tani waxay la micno tahay in qaar ka mid ah mashaariicda dayactirka ee la qorsheeyay balse dib u dhacay, hadda la fulin karo. Waxay sidoo kale noo oggolaan doontaa inaan bixino adeeg dayactir iyo barnaamij sare u qaadi doono tayada guryaha, isla markaana hubin doona inaan la jaanqaadeyno buuxinta heerarka cusub.
- Waxaa jiri doono fursado dheeraad ah si aad uga qayb qaadato la shaqeynta mulkiilahaaga. Waxaa jiri doona taageero dheeraad ah oo lagu xoojinayo ka qaybgalka macaamiisha, si codkooda loo maqlo marka la adeegsanayo adeegyada maalinlaha ah iyo heerka guddiga maamulka.
- Baaxadda adeegyada Places for People iyo tirada guryaha ay leeyihiin oo ay maamulaan waxay ka dhigan tahay in macaamiil badan oo ka tirsan Elim ay heli doonaan adeegyo iyo qandaraasleyaal kuwaas oo ka howlgala deegaannadooda.
- Elim waxay awood u lahaani doontaa helida taageero ka timaadda kooxda Places for People si ay nooga caawiso maamulidda hawlaheenna ganacsi. Tani waxay naga caawin doontaa inaan helno nidaamyo horumarsan oo Teknolojiyadda Xogta ah (IT), tababar iyo fursada shaqaaleysiin. Tani waxay naga caawin doontaa inaan horumarino adeegyada aan kuu fidinno.

Inkastoo Elim ay qayb ka tahay Places for People, dhammaan adeegyada sida kasoo warbixinta dayactirka, bixinta kirada iyo kharashaadka adeegyada, ama sheegida arrimaha ka yimaada hoygaaga ama kooxda taageerada hoyga, waxaa sii wadi doona bixintooda shaqaalaha hadda jooga xafiisyada shaqaynya. Tani waxay ka caawin doontaa in dhammaan adeegyada iyo xiriirka naga dhexeeya macaamiisha ay si habsami leh u sii socdaan inta lagu jiro marxaladdan isbedelka.

Qorshahan ma keeni doono wax isbeddel ah oo ku yimaada amniga kireysiga ama heshiiska kirada ee aad la leedahay Elim Housing Association. Elim Housing waxay sii ahaan doontaa mulkiilahaaga masuulka ka ah gurigaaga iyo heshiiskaaga kirada. Ma jiri

doono wax wareejin ah oo ku saabsan lahaanshaha gurigaaga, mana jiri doono wax isbeddel ah oo lagu sameynayo shuruudaha heshiiskaaga kirada ama kireysiga, inkasta oo Elim ay noqoneyso laan hoosaad ka tirsan Places for People waqtigan. Qorshaha midoowga ma keeni doono wax isbeddel ah oo ku yimaada kiradaada, kiradaada iyo kharashaadka adeegyada ayaa weli lagu xisaabin doonaa si la mid ah sidii hore, waxaana ay kordhi doonaan hal mar oo kaliya sanadkii.

**Ka jawaabidda Latashiga Midowga**

Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha midoowida, waxaad weydiin kartaa su’aalo, ama uga jawaabi kartaa latashiga siyaabo kala duwan:

Shirarka fool-ka-foolka ah ama shirarka onlaynka ah

Waxaad ka qayb qaadani kartaa mid ka mid ah shirarkeena onlaynka ah ama fool-ka-foolka ah, halkaas oo aad fursad u heli doonto inaad dhagaysato xog ku saabsan qorshaha midoowida kooxda hogaanka Elim, isla markaana si aad u dhiibato faallooyin ama aad u waydisid wixii su’aalo ah oo aad qabto.

| **Taariikhda** | **Waqtiga** | **Goobta / Faahfaahinta** |
|---|---|---|
| 20-ka Agoosto 2025 | 6 galabnimo - 7 galabnimo<br>Onlayn | Shirka onlaynka ah (faahfaahinta ku sugan mareegteena www.elimhousing.co.uk ) |
| 20-ka Agoosto 2025 | 12 galabnimo - 2 galabnimo<br>Kulan fool-ka-fool ah oo aad imaan karto adigoon ballan qabin | **Bristol**<br>Hamilton House, 80 Stokes Croft, Bristol, BS1 3QY |
| 21-da Agoosto 2025 | 12:30 galabnimo - 2:30 galabnimo<br>Kulan fool-ka-fool ah oo aad imaan karto adigoon ballan qabin | **Gloucester**<br>The Redwell Centre, Redwell Road, Matson Gloucester GL4 6JG |
| 4-ta Sebtembar 2025 | 12 galabnimo - 2 galabnimo<br>Latashiga iyada oo la iska socdaalaayo | **Birmingham**<br>John Smyth House, 62 Parade, Birmingham B1 3QQ |
| 4-ta Sebtembar 2025 | 6 galabnimo - 7 galabnimo<br>Onlayn | Shirka onlaynka ah (faahfaahinta ku sugan mareegteena www.elimhousing.co.uk ) |

Haddii aad ku nooshahay mid ka mid ah xarumaha hoyga aay gacanta ku hayso Elim, shaqaalaha Elim waxay ku siin doonaan fursado aad ku dhiiban karto ra’yigaaga ku saabsan qorshaha midoowga inta lagu jiro kulamada guryaha.

Haddii aad ku nooshahay mid ka mid ah goobaha Gypsy iyo Traveller ee ay leedahay Elim, shaqaalaheena hoyga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay kaa codsadaan ra'yigaaga inta lagu jiro booqashooyinka joogtada ah ee goobta ee bisha Agoosto.

Haddii aad ku nooshahay guryahayaga loogu talagalay baahiyaha guud, shaqaalaheena hoyga ayaa sii wadaaya booqashada dhammaan macaamiisha iyada oo aay taasi qayb ka tahay mashruuca 'Behind Every Door', waxaana sidoo kale fursad u heli kartaa inaad bixiso ra'yigaaga inta lagu jiro booqashooyinkan guryaha.

Fikrad-celinta adigoo adeegsanaya mareegta, telefoon ama iimayl.

Haddii aad doorbidayso inaad ka qayb-qaadanin shirka la talinta, waxaad sidoo kale ra'yigaaga ku dhiiban kartaa siyaabaha soo socda:

- Adigoo buuxinaya foomka jawaab-celinta latashiga midoowida ee ku yaalla mareegteena: www.elimhousing.co.uk
- Adiga oo naga so wacaayo 01454 411172 – waxaad la hadli kartaa Sarkaalkaaga Hoyga ama xubin kasta oo ka mid ah kooxda hoggaanka Elim.
- Adiga oo Iimayl uga diraaya info@elimhousing.co.uk
- Adigoo la xiriiraya Rachel Pinchin, oo ah Ku-xigeenka Maamulaha Guud ee Elim Housing, Units 3 & 4, Briarlands Office Park, Rudgeway, BS35 3QH.

Ka dib dhammaadka wada-tashiga ee dhici doona 10-ka Sebtembar 2025, soo koobidda macluumaad ku saabsan aragtida macaamiisha ayaa dib u eegis lagu samayn doonaa ayadoo ay sameynayaan Guddiga Elim. Ka dib marka dib u eegsta la sameeyo, waxaan macaamiisha siin doonaa soo koobid laga sameeyay jawaab celintii ay bixiyeen, natiijooyinka kasoo baxay wada-tashiga, iyo sida aan u xallin doono wixii dhibaatooyin ah ee la soo qaaday. Tani waxaa loo gudbin doonaa dhammaan macaamiisha iyada oo loo marinaayo mareegteena iyo warqad ahaanba.

Haddii wejiga koowaad ee midoowitaanka uu guuleysto oo Elim noqoto laan hoosaad ka tirsan Places for People, waxaa jiri doona waji labaad ee wada-tashiga macaamiisha ah sannadka 2026. Tani waxay keeni doonta fursad dheeraad ah in la helo aragtidaada ka hor inta aan Elim si buuxda ugu biirin kooxda Places for People.

**Waad mahadsan tahay.**

Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga aad galisay akhrinta warqaddan. Qorshaha mdoowitaanka wuxuu calaamad u yahay oo aay ka dhgan tahay isbeddel muhiim ah oo ku yimaada Elim. Waxaan si weyn ugu kalsoonahay oo aan aaminsanahay in tani ay faa'iido u leedahay macaamiisha Elim, isla markaana ay naga caawin doonto inaan sii wadno daboolista baahida guryaha iyo inaan bixinno guryo beddela nolosha dadka.

Waxaan rajeynayaa inaad ka faa'iideysan doonto geeddi-socodkan wada-tashiga si aad u soo jeediso wixii su'aalo ama walaac ah ee aad qabto, waxaana rajeynayaa in aan helo fikradahaga ku saabsan midoowitaanka inta lagu jiro lixda toddobaad ee soo socota.

Si xushmad leh,

Paul Smith
Maamulaha Guud, Elim Housing